

# Cytomegalovirus (CMV) iyo Congenital CMV

## WARQADA XAQIIQADA EE ADEEG BIXIYAASHA DARYEELKA ILMAHA

### Waa maxay CMV iyo congenital CMV?

CMV waa fayras caan ah. Qof kasta, da'a kastaba wuu haleeli karaa CMV. Kala badh dadka waaweyn ee Maraykanka ah wuxuu fayrasku haleelay iyagoo jira da'da 40 sano. Inta badan dadka caafimaadka qaba ma oga inay qabaan CMV sababtoo ah inta badan ma keento wax calaamado ah ama saameyn waxyeello leh.

Si kastaba ha ahaatee, haddii aad tahay haweeney uur leh oo lagaa helo CMV, faayruskan waa mid mandheerta uga gudbi kara ilmaha uurka ku jira. Marka ilmuhu ku dhasho CMV, waxaa loo yaqaanaa CMV-da lagu dhasho. CMV lagu dhasho waxay noqon kartaa mid halis ah waxaana laga yaabaa inay waxyeelo u geysato maskaxda, indhaha, ama dhegaha gudaha ee dhallaanka qaarkood ee qaba cudurka ka hor dhalmada. Qaadashada tallaabooyin lagu yareynayo halista qaadista CMV aad ayay muhiim u tahay haddii aad uur leedahay ama aad ka fekereyso inaad uur yeelato.



### Talooyin lagu yareynayo halista aad ku qaadi karto CMV

- Gacmaha in ay ku dhaqdo saabuun iyo biyo mar kasta, gaar ahaan markaad ilmaha duufka ka biiso sanko ama afka iyo markaad ka baddesho xafaayada.
- Waa in ay ilmaheeda yaryar ka dhunkato wejiga intii ay ka dhunkan lahayd bishimaha.
- Afkeeda waa in aysan gelin waxyaabo ku jiray afka ilmaheeda, sida cinjirka jaqista ama burushka cadeyga ah. Sidoo kale, waa inaan la wadaagin cunto, cabitaan, maacuun, iyo tuumda dareeraha lagu dhuuqo.
- Si sax ah u nadiifi boolbarada, miisaska beddelka, iyo goobaha kale ee laga yaabo inay maraan kaadida ama candhuufta ilmaha.

### Sidee ayaa CMV layskugu gudbiyaa?

CMV inta badan wuxuu u gudbiyaa qofba qofka kale markay istaabtaan dareeraha jidhkoodu. CMV wuxuu ku badan yahay carruurta waxaana laga heli karaa xaddi badan kaadida carruurta yaryar iyo candhuufta. Carruurta waxay u gudbin karaan fayraska dadka kale kadib markay muddo badan qabaan caabuqa, xataa haddaanay u muuqan inay xanuusanayaan.

CMV waxa lagu faafi karaa xidhiidh dhow marka xafaayadda la beddelo, dhunkashada, quudinta, iyo hawlo kale oo qof caafimaad qaba uu taabto kaadida ama candhuufta qof qaba CMV.

### Miyaa carruurta qabta CMV ay joogi karaan guriga lagu daryeelayo ilmo?

Carruurta qabta CMV da lagu dhasho ama qaada CMV ka dib dhalashada waa iska caadi haddii ay guriga joogaan. Carruurta la og yahay inay qabaan CMV uga gudbin karaan CMV in ka badan ilmo kasta oo kale.



## Miyaad ogtahay?

- Dadka daryeela carruur yar-yar ama kuwa raadqaad ah waxay leeyihiin jaanis badan oo uu ku haleeli karo CMV sababtoo caabuqa CMV wuxuu caan ku yahay carruurta.
- CMV lagu dhasho waa ta ugu caansan waxyaabaha keena in ilmuhu fayras ku dhasho Maraykanka gudahiisa.
- CMV nooca lagu dhasho waa sababta ugu badan ee aan ahayn hiddaaca ee keenta in ay carruurta ka naafoobaan maqalka.
- Qiyaastii 1 ka mid ah 200 ee carruurta ah ayaa ku dhasha CMV gudaha Minnesota.
- Qiyaastii 1 ka mid ah 5 tii carruur ah ee ku dhasha CMV waxay ku dhalan doonaan ama yeelan doonaan walaacyo caafimaad oo waqti dheer ah, sida maqal la'aan, arag la'aan, suuxdin, ama naafo dhinaca korriinka ah.

## Sidee ayaa carruurta looga baadhaa inay ku dhasheen CMV?

CMV da lagu dhasho waxaa inta badan laga helaa dhallaanka da'doodu ka yar tahay 21 maalmood iyadoo la baadho muunad laga qaado dhiigooda ama kaadida.

Bishii Febbarwari 2023, Minnesota waxay noqotay gobolkii ugu horreeyay guud ahaan qaranka si looga baadho dhammaan carruurta ku dhalatay CMV taasoo qayb ka ah barnaamijka baadhista carruurta, si aad u ogaato carruurta aad daryeesho ee qabta CMV ga lagu dhasho.


## Sidee ayaan u caawin karaa waalidka dhalay carruurta ku dhashay CMV?

Ogaanshaha in ilmuhu qabo CMV da lagu dhasho waxay u keeni kartaa welwel ama walbahaar waalidiinta qaarkood. Mid kamid ah hababka ugu wanaagsan si aad taageero ugu muujiso waa inaad naaftaada barto waxyaabaha ku saabsan CMV da lagu dhasho.

Sidoo kale, xusuusnow in CMV uu yahay fayras carruurnimo oo caadi ah iyo in carruurta qaba CMV ama CMV da lagu dhasho waa inaan loola dhaqmin si ka duwan carruurta kale ee aad daryeesho.

## Halkee ayaan ka heli karaa macluumaadka ku saabsan CMV ama CMV da lagu dhasho?

- Kala hadal dhakhtarka aad la xiriirto.
- Kala soo xiriir MDH taleefanka 651-201-3650, ama [health.cyshn@state.mn.us](mailto:health.cyshn@state.mn.us), ama booqo barta intarnetka ee MDH:



[www.health.mn.gov/CMV](http://www.health.mn.gov/CMV)